

Waalidiinta iyo Daryeeleyaasha Gacalka Ahow,

Waxaa i farxisey in aan awoodney in aan toddobaadkan gudihisa ardayda goobta ku soo dhaweyno. Goob wax ku barasho waa muhiim, waxbarshada keliyah uma ah balse waa u muhiim caafimaadka maanka caruurtana.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo iskuul ku laabashada ku saabsan booqo bogga web-kayaga ah [School arrangements - back to school \(COVID-19\) \(leicester.gov.uk\)](https://www.leicester.gov.uk/school-arrangements-back-to-school-covid-19/).

Waxaan rabi lahaa inaan idin xusuusiyo in, inkasta oo iskuulada ardayda loo furey, ay weli tajay in aan u hogaansanaano tilmaan-bixinta heerka qaran ah. Waxyaabahan wax xadidaada ah waxaa loo sameeyey si adiga iyo kuwa aad jeceshahay loo badbaadiyo iyo si loo yareeyo faafista coronavirus (Koronafirus).

- Laguu ma ogola in aad goob dhismo gudihisa ah ugu soo dhowaato qof aadan isla nooleyn, waxaa waxan ka mid ah xafladaha maalmaha dhalashada iyo ballamada wada ciyaarista iwm.
- Waxaa laguu ogol yahay oo keliyah in aad qof kale oo guriga kale degan aad kula kulanto goob banaanka ah oo ay hadawada u ufulan tahay

Tani waa ku saa'id tallo-bixinta caafimaadka guud ku saabsan ee ah gacmaha oo si joogto ah loo dhaqdo, wejiga oo wax lagu daboosho halkii looga baahdaba, iyo ku dhaqanka kala fogaanshaha bulsho; waana in aan dhamaanteen sii wadanaa guri joogista inta ugu badan ee suurtoogalka ah.

Si aad u hesho fahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan wadada khariidada ah ee ay Dowladda dejisey iyo taariikhda wax tilmaamista ah ee booqo website-ka Dowladda oo laga helo goobta ah [COVID-19 Response - Spring 2021 - GOV.UK \(www.gov.uk\)](https://www.gov.uk/covid-19-response-spring-2021/)

Fadlan xusuusnow in aysan taariikhahan aheyn kuwo cayiman oo ay wax laga bedeli karo haddii aysan xaalada coronavirus-ka wax iska bedelin ama ay ka sii darto.

Waxaan rabaa inaan idin mahadceliyo maadaama aad ilaa hadda tilmaan-bixinada ku dhaqanteen. Waa aan ogahay in aysan midkeena wax u sahlaneyn iyo in aan wada rabno in ay nolosheena si uun caadi ahaanteedii noogu soo laabato. Haddii aan sii wadno ku dhaqanka tilmaan-bixinta oo aanan wada kulmin waqti yar oo intii hore ku sii saa'id ah, markaa rajadeena ah inaan helno Xagaa (summer) caadi ah baa rumoobi kartaa.

Waa daacad idin ahaade

Ivan Browne

Agaasimaha Caafimaadka Guud, Gollaha Magaalada Leicester
(Director of Public Health, Leicester City Council)